

Xafiisyada Laamaha:

1700 - 155 Carlton St.
Winnipeg MB R3C 3H8
Tel. 204-945-2476
Tel. lacag la'aanta:
1-800-782-8403
Faks: 204-945-6273
E-mail: rtb@gov.mb.ca

143-340 9th Street
Brandon MB R7A 6C2
Tel. 204-726-6230
Tel. lacag la'aanta:
1-800-656-8481
Faks: 204-726-6589
E-mail:
rtbbrandon@gov.mb.ca

113-59 Elizabeth Dr.
Thompson MB R8N 1X4
Tel. 204-677-6496
Tel. lacag la'aanta:
1-800-229-0639
Faks: 204-677-6415
E-mail:
rtbthompson@gov.mb.ca

The Residential Tenancies Branch Laanta Kirada Deegaanka

WARQADDA XAQIIQADA

Laanta Kirada Deegaanka

Laanta Kirada Deegaanka waxay fulisaa afar kaalin oo muhiim ah:

- **Macluumaadka/Aqoonta**
- **Baaritaanka**
- **Dhexdhexaadinta**
- **Xukunka**

Macluumaadka/Aqoonta

Waxaan milkiileyaasha hantida iyo kiraysteyaasha siinaa macluumaad ku saabsan xuquuqda ay leeyahiin iyo mas'uuliyadda saran sida hoos timaada *The Residential Tenancies Act* iyo *The Life Leases Act* iyo nidaamkena. Waxaan macluumaadka ku bixinaa telefoonka, wareeysiyada dadka socodka ku yimaada ama warqadaha la diro.

Waxaan sharciyadana u soo bandhignaa kooxaha milkiileyaasha guryaha, kiraysteyaasha ama shakhsiyaadka kale. Waxaan bixinaa seminaaro si dadka loo baro xuquuqda ay leeyahiin iyo mas'uuliyadda saaran milkiileyaasha iyo kiraysteyaasha.

Waxaan haaynaa warqadaha xaqiiqada oo ku saabsan mowduuyada ay xiiseyaan milkiileyaasha iyo kiraysteyaasha. Waxaa ka mid ah: dabaajida la dhigo, ogeeysiisyada, kiraynta uu sameeyo kiraystaha, xaqa loo leeyahay in la soo galo, xuquuqda iyo mas'uuliyadda.

Baaritaanka

Waxaan baarnaa jebinta suurogalka ah ee lagu sameeyo *The Residential Tenancies Act* iyo *The Life Leases Act*, waxaan bixinaa wararka salka u ah si loo xalliyo qilaafaadka. Saraakiisha baarista waxay la xariiraan milkiilaha iyo kiraystaha iyo marqaati kasta ama wakaaladaha ku lug leh (tusaale ahaan baareyaasha caafimaadka dadweynaha). Macluumaadka aan helno inta ay socoto baarista waxaa heli kara milkiilaha iyo kiraystaha.

Dhexdhexaadinta

Shaqaalahena waxay isku dayaan in ay dhexdhexaadiyaan qilafaadka badanaa ka dhexeeyo milkiileyaasha iyo kiraysteyaasha (tusaale ahaan sheegashada dabaajida la dhigo, sheegashada magta, ogeeysiiska soo gabogabeynta). Sarkaalka dhexdhexaadinta ayaa la shaqeeyo milkiilaha iyo kiraystaha si uu ugu kaalmeyo in ay gaaraan heshiis ay raali ka yahiin labada dhinac. Dhexdhexaadinta waxaa lagu sameyaa telefoon iyo shirarka lagu qabto telefoonka, weji ka weji ama qoraal ahaan. Mar kasta, heshiisyada la dhexdhexaadiyay waxaa lagu xaqiijiyaa qoraal. Heshiiska waxaa la hirgelin karaa haddii hal dhinac ku guul dareysato in ay dhinaceeda ka fuliso heshiiska.

(fiiri bogga xiga)

Xukunka

Xukunka waa habka lagu gaaro go'aanka. Go'aamada waxaa lagu sameyaa dhageysiga ama macluumaadka qoran ee laga helo milkiilaha ama kiraystaha inta ay socoto baarista. Milkiilaha iyo kiraystaha waxay taggi karaan dhageysiga iyaga oo watta caddeyntooda iyo marqaatiyadooda. Dhamaan go'aanada waxaa loo soo saaraa qoraal ahaan, waxaana la bixiyaa asbaabta ka dambeyso go'aanada la gaaray. Dhamaan go'aanada waxaa laga qaadan karaa racfaan loo gudbiyo Residential Tenancies Commission..